9

Dib u samaynta iyo dayactirka

Repairs and maintenance
– Somali translation

gateway housing association

Maadaama aanu nahay hantiilahaaga, waxaanu ku ballanqaadaynaa inaanu ku siino adeegga dib u samaynta iyo dayactirka ee ugu wanaagsan.

Waa masuuliyadayada inaanu hubaal ka dhigno in gurigaaga dibediisu ku sugantahay xaalad wanaagsan, iyo inaanu dib u samayno waxyaabaha ku xidhan iyo waxyaabaha ku rakiban gurigaaga gudihiisa, sida kijada, qasabadaha iyo nidaamada kululaynta.

Waa masuuliyaddaada inaad dayactirto gurigaaga gudihiisa isla markaana aad samayso waxyaabaha diba u samaynta u baahan ee yaryar. Waxa kale oo ay tahay inaad samayso waxyaabaha soo socda.

- **Soo sheegto** sida ugu dhakhsaha badan dhammaan wixii dib u samayn u baahan.
- **Bedel** balaagyada iyo fuyuusyada.
- **Bedel** guluubyada laydhadhka.
- **Bedel** biinanka guriga, oo ay ka midyihiin biinanka taayirada lihi.
- **Bedel** balaagyada iyo silsiladaha saxanada wax lagu dhaqo, xamaamada iyo saxanada lagu maydho.
- **Bedel** qaybta lagu fadhiisto ee musqusha ee jabta.
- **Ku xidho** daboolayaashaada daaqadaha, biraha daahyada, biraha koodhadhka la sudho iyo rasooyinkaaga.
- **Qurxi** gurigaaga gudihiisa, oo ay ku jiraan dildilaacyada yaryar ee gidaarada iyo saqafka.
- **Ku rakib** qufulo dheeraad ah iyo boolal haddii aad rabto.
- **Keenso** mafaatiix kale. Haddii aad iska xidho adiga ayaa masuul ka ah inaad bixiso lacagta quful sameeyaha si aad qufuladaada u bedesho iyo dib u samaynta wixii jaba.
- **Sin** albaabada gudaha si ay u furmaan una xidhmaan kaarbetka la dhigo guudkiisa.
- **Safee** saxanada wax lagu dhaqo, ka xamaamka iyo ka lagu faraxasho.
- **Bedel** qasabadaha wax lagu dhaqo.
- **Bedel** sideyaasha albaabka, sanduuqa boosta iyo sidaha albaabka lagu garaaco.
- **Dib u samee** wixii ogaan ay u jebiyaan ama si shil ahba adiga ama martidaadu, tusaale ahaan daaqadaha jaba ama kabadhada kijada ee jaba iyo miisaska.
- **Naga hel** ogolaansho qoraal ah anaga dhammaan wixii aad ka bedelayso (ee ay ka midyihiin ku xidhitaanka saxanada satalaytka).
- **U ogolow** shaqaalahayaga iyo qandaraasleyaashayada inay soo galaan gurigaaga si ay u baadhaan una sameeyaan wixii dib u samayn u baahan ama kormeerid, si wanaagsanna ula dhaqan.

- **Kaga tag** guriga xaalad nadiif ah markaad ka guurto.

Masuul kama tihid adigu wixii dib u samayn u baahan ee meelaha la wadaago, laakiin waxaanu kaa codsanaynaa inaad soo sheegto wixii dib u samayn u baahan ee daruuri ah ee meelahan.

Soo sheegitaanka dib u samayn

1 Haddii aad u baahantahay in dib u samayn lagu sameeyo gurigaaga, la soo hadal kooxdayada adeegga macaamiisha telifoonka ah 0800 052 9922 (Isniin illaa iyo Jimce, 9am to 5pm). Haddii dib u samayntaadu tahay degdeg kana baxsantahay saacadaha shaqada, fadlan la soo hadal telifoonka ah 0800 085 6064. haddii dib u samayntaadu aanay degdeg ahayn, waxa kale oo aad ku soo sheegi kartaa websaytka ah www.gatewayhousing.org.uk ama email ahaan customerservices@gatewayhousing.org.uk

2 telifoonka waxaanu ku diiwaangelin doona isla hal maalin oo kuwa shaqada ah gudahood kuna qabanqaabin doonaa inuu qandaraasle kugu soo booqdo isla muddooyinka la daabacay gudahooda.

Muddooyinka la daabacay waa sida soo socda.

Degdegga – inaanu kaga jawaabo afar saacadood gudahood kuna dhamaystirno 24 saacadood gudahooda

Degdegga – inaanu kaga jawaabno toddoba maalmood gudahood

Caadiga ah – inaanu kaga jawaabno 30 maalmood gudahood

3 Waxaanu kuu soo bandhigi doonaa ballan gelin hore ama gelin dambe ah oo ah taariikh cayiman (iyadoo laga duwayo waqtiyada dugsiga la tegayo ama laga imanayo, haddii aad doonayso).

4 Waxaanu siin doonaa codsigaaga dib u samaynta muddo waxaanuna kuu sheegi doonaa waqtiga la dhamaystiri doono.

5 Waxa kale oo aanu ku siin doonaa lambarka tixraaca ee shaqada.

6 Haddii aanu u baahano inaanu soo eegno marka hore dib u samayntaada, waxaanu kuu soo bandhigi doona ballan gelinka hore ama gelinka dambe ah. Waxaanu ku samaynaa soo eegitaanadan isla toddoba maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda.

7 Haddii aad u baahantahay waxaanu kuu qabanqaabin doonaa turjumaanka calaamadaha, turjumaan ama af celiye. Tani waxay sida caadiga ah noqon doontaa telifoonka guudkiisa, khadka luqadda ama booqasho gurigaaga lagu yimaado.

Samaynta dib u samayn

Markaanu gurigaaga dib u samayn ku samaynayno, anaga iyo qandaraasleyaashayadu waxaanu samayn doonaa waxyaabaha soo socda.

- Soo diri doonaa qof si buuxda u tababaran.
- Ku tusi doonaa aqoonsigayaga ofishalka ah.
- Ahaan doonaa qaar akhlaaq leh oo caawimo leh.
- Kaga tegi doonaa gurigaaga nadiif.
- Ixtiraami doonaa qarsoodiga gurigaaga.
- Kuu sheegi doonaa haddii aanaan dhamaystiri Karin dib u samaynta, kuu sharxi doonaa sababta kuuna qabanqaabin doonaa ballan kale.
- Haddii aanu soo kormeerayno dib u samaynta, waxaanu kuu sheegi doonaa waxa laga qaban doono waxaanuna kuu qabanqaabin doonaa ballan kormeeritaanka ah.
- Waxaanu ku siin doonaa lambar xidhiidh si aad u awoodi karto:
  - Inaad ballantaada bedesho; ama
  - noogu soo sheegto haddii aanad ku qanacsanayn dib u samaynta ama haddii aan qandaraasluhu imanin.
- qandaraasluhu wuxuu kaa codsan doonaa inaad saxeexdo foomka dhamaystirka marka dib u samaynta la sameeyo. Fadlan hubaal ka dhig inay tafaasiishu sax yihiin iyo inaad ku qanacsantahay shaqada.

La socoshada adeeggayaga dib u samaynta

Waxaanu kuu soo diri doonaa rayi qaadista ku qanacsanaanta si aanu kuugu weydiino aragtiyahaaga ku saabsan adeeggayaga dib u samaynta isla 10 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood marka shaqada la dhamaystiro.

Haddii aad noo sheegto inaanad ku qanacsanayn shaqada, baadhitaan ayaanu ku samayn doonaa. Haddii weli dhibaato ay jirto, waanu sixi doonaa.

Haddii aad ku qanacsanayd shaqada, waxaanu tahniyaddaada u gudbin doonaa qandaraaslaha.

Waxaanu si joogto ah ugu daabici doonaa macluumaadka ku saabsan waxqabadka dib u samaynaha warsidahayaga dadka deggan ee la yidhaahdo, Open Door.

Ahdaaftayada dib u samaynta

Waxaanu doonaynaa inaanu dib u samaynaha ku samayno sida ugu dhakhsaha badan kuna dhamaystiro muddooyinka aanu u qabanay, oo ku xidhan nooca dib u samaynta iyo siday degdeg u tahay.

Dib u samaynta degdegga ah
Waxaanu kaga jawaabi doonaa afar saacadood kuna dhamaystiri doonaa 24 saacadood gudahood

- Meesha aanu gurigu ammaan ahayn kadib markii wax la yeelay, weerar cunsurinimo ahi ku dhacay, ama qalalaase guri.
- Meesha uu nidaamka gelitaanku xunyahay ee aanay dadka deggan iyo dadka booqanayaa geli Karin kana bixi Karin dhismaha (dib u samayn aan rasmi ahayn ayaanu ku samayn doonaa si ay dadku u geli karaan ugana bixi karaan).
- Bullaacadaha awdma ee biyaha qashinka ah dib ugu soo celinaya saxanka lagu maydho, ka wax lagu dhaqo, ka lagu faraxasho ama musqusha.
- ay biyaha qaboobi go'anyihiin.
- Aanay jirin kulaylinta guriga ama biyo kululi inta u dhaxaysa 30ka September iyo 31ka March.
- Aanay musqushu biyaha sii deyneyn isla markaana ay tahay musqusha keliya ee gurigu leeyahay.
- Laydhku go'anyahay.
- Laydhku aanu ammaan ahayn, fiishta dabka ama qalabka korontadu.
- Jaranjarooyinka la wadaagaa aanay laydh lahayn.
- Dabayl, shil ama daad waxyeeleen dhismaha.
- Tiishku xunyahay (haddii uu yahay tiishka keliya, ama tiishka keliya ee dabaq kastaba taga).
- Bedelaadda muraayadaha jaba meesha ay jirto khatar ammaanka ah ama dhaawac geysan kartaa.
- Ka safaynta waxyaabaha gidaarada lagu qoro ee cayda ah ama cunsurinimada ah ee meelaha la wadaago.

Dib u samaynaha degdegga ah
Kaga jawaabi doonaa toddoba maalmood gudahood

- Haddii korontadu ka go'antahay qayb ka mid ah gurigaaga.
- Biyuhu ka go'anyihiin qayb ka mid ah gurigaaga.
- Aanu jirin hiitka ama biyo kululi (inta u dhaxaysa 1da April iyo 30ka September).
- Nidaamka gelitaanka gurigu aanu shaqaynayn (dib u samayn buuxda).
- Qasabad aad xidhi kari weydo.
- Qoryaha jaranjarada ama birta la cuskado oo soo fuqday.
- Looxa dhulka ama jaranjarooyinka oo xumaaday.

- Dhammaan wixii ah dib u samaynaha degdegga ah ee korontada.
- Saqaf darooraya, minjoroor ama qasabadaha hoose, haddii ay gurigaaga qoynayaan.
- Bedelaadda daaqadaha (meesha ay yihiin masuuliyadayada).
- Albaabada iyo daaqadaha dibeda ee aan ammaanka ahayn (meesha aanay tani degdeg ahayn).
- Looxaanta dhulka oo jaba ama liqliqanaya (meesha ay khatar yihiin).
- Sibidh soo fuqaya (meesha ay u dhowdahay inuu khatar keeno).

Dib u samaynaha caadiga ah
Waxaanu kaga jawaabi doonaa 30 maalmood gudahood

- Dib u cusboonaysiinta ama bedelaada taangiyada biyaha kaydiya iyo kuwa biyaha kulul.
- Hiitarka ama qalabka nadaafadda (saxanada musqusha, ka biyaha iyo iwm) ee aan shaqaynayn ama aan nadiif ahayn ee aanay mudnaanaha kale daboolayn.
- Dib u samaynta ama dib u cusboonaysiinta qasabadaha biyaha wasakhda ah qaada, qasabadaha xun ama faalfyada xun.
- Dib u samaynaha qalabka hiitka guriga kululeeya ee aanay mudnaanaha kale daboolayn.
- Bedelaadda albaabada iyo daaqadaha dibeda.
- Dib u samaynta minjaroorada awdma ama liigaya iyo qasabadaha biyaha roobka.
- Dib u samaynaha yaryar ee jaranjarooyinka.
- Ka masaxaadda qoraalada aan cayda ahayn gidaarada.
- Dhammaan dib u samaynaha aan ahayn kuwa kor ku qoran ee saamaynaya ammaankaaga ama raaxadaada shakhsiga ah, ee aan masuuliyaddaada ahayn.

Aan degdegga ahayn

- Deyrarka
- Gidaarada dibeda

Dadka deggan ee dayacan (tusaale ahaan dadka daciifka ah ama naafada ah iyo kuwa ku jira guryaha dadka lagu xannaaneeyo), waxa laga yaabaa inaanu ula dhaqano dib u **samaynaha caadiga** ah sidii **qaar degdeg ah**.

Lambarka dayactirka ee telifoonka lacag la'aanta ah

Dhammaan wixii dib u samayn ah waa in loo soo sheegaa kooxda adeegga macaamiisha adigoo la soo hadlaya telifoonka

0800 052 9922.

Telifoonkan waxa la heli karaa Isniinta illaa iyo Jimcaha, 8am to 6pm. Waxa kale oo aad kala soo xidhiidhi kartaa websaytka ah www.gatewayhousing.org.uk ama emailka customerservices@gatewayhousing.org.uk (aan degdegga ahayn).

Haddii ay tahay degdeg ka baxsan saacadaha xaffiiska ee kor ku qoran, fadlan la soo hadal 0800 085 6064.

You can ask for this leaflet in large print, on audio tape or in another language. Please contact us on 020 8709 4300.

আপনি এই লিফলেটটি বড় ছাপায়, অডিও টেপে বা অন্য যে কোন ভাষায় পেতে পারেন। দয়া করে আমাদের সাথে যোগাযোগ করুন ০২০ ৮৭০৯ ৪৩০০ নম্বরে। [Bengali]

Waxaad dalban kartaa warqaddan oo ku daabacan farta waawayn, iyadoo ku duuban cod ama ku tarjuman luqadaha beesha. fadlan nagala soo xidhiidh telefoonka ah 020 8709 4300. [Somali]

Możesz poprosić o tę ulotkę drukowaną dużą czcionką, w postaci zapisu audio lub w innym z języków społeczności. Skontaktuj się z nami pod numerem telefonu 020 8709 4300. [Polish]

Quý vị có thể xin tờ rơi (tờ thông tin) này bằng khổ chữ lớn, băng ghi âm hoặc tiếng nói khác trong cộng đồng. Xin vui lòng liên lạc với chúng tôi, điện thoại số 020 8709 4300. [Vietnamese]

你可要求這份單張的大字印刷本、錄音或其他社區語言的版本，請致電 020 8709 4300 與我們聯絡。 [Chinese]

آپ یہ کتابچہ بڑے حروف، آڈیو یا کسی دوسری کمیونٹی زبان میں طلب کر سکتے ہیں۔ براہ مہربانی ہم سے فون نمبر 020 8709 4300 پر رابطہ کریں۔ [Urdu]

Awarded for excellence

INVESTOR IN PEOPLE

North River Alliance

Gateway Housing Association
409-413 Mile End Road, London, E3 4PB
Residents: 020 8709 4300
General enquiries: 020 8909 4409
Fax: 020 8709 4400
Email: enquiries@gatewayhousing.org.uk
www.gatewayhousing.org.uk

Waraaqdani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada aanu ku siin doono. Waraaqdani ma saamayn doonto xuquuqahaaga lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha. **Aad ayay u mahadsanyihiin dhammaan dadka deggan ee gacanta ka geystey soo saaritaanka waraaqdan.**